{«DateLetterGenerated»}

{«Guardian»}
{«MailAddress»}
{«MailCity», «MailState» «MailZip»}

Gacaliye/Gacaliso {«Guardian»}:

Taarikhda markay ahayd{«InterviewDate»}, wakiil ka tirsan{«HDName»} ayaa kula hadlay si uu ugala hadlo ilaha suurtogalka ah ee soo-gaadhista rasaasta ilmahaaga. Warbixinta ku lifaaqan waxay sharraxaysaa saamaynta waxyeellada lead-ka ay ku leedahay ilmahaaga waxayna sidoo kale faahfaahinaysaa adeegyada taageerada ay la siiyay ilmahaaga kuwaas oo wax looga qabanaayo saamaynadan.

Hoos waxaa ku qoran waxyaabo aad hadda samayn karto si aad u yarayso ama ooga hortagto soo-gaadhista waxyeellada lead-ka ee ilmahaaga:

- Si joogta ah u dhaq dusha sare ee sagxadaha sida daaqadaha, jaardiinkaa, iyo sagxadaha dhulka guriga.
- Wasakhda iyo qashinka ku nadiifi adiga oo isticmaalaya nadaamka Faakuumka Waxtarka Sare leh (HEPA). Si amaah ah ayaa faakuumka HEPA looga heli karaa waaxda caafimaadka deegaanka ama wakaalada guryeynta.
- Dhaq gacmaha ilmahaaga, gaar ahaan kahor inta uusan wax cunin oo seexan, iyo kadib marka uu ku ciyaaro sagaxadda dhulka ama dibadda.
- Marar badan dhaq dharka ilmahaaga, dharka uu ku seexdo habeenki, iyo alaabaha ay ku ciyaaraan.
- Sii ilmahaaga cunto dheellitiran oo ay ku badan tahay kaalshiyamka (tusaale ahaan, caano, farmaajo, tofu, iyo caano yogurtka) iyo macdanta iron-ta (tusaale ahaan, subagga lawska, qudaarta cagaaran, sabiibka, iyo hilibka lo'da) iyo cuntooyinka dufanku ku yar tahay (iska ilaali cuntooyinka saliido badan lagu shiilo). Ku dhiiri geli ilmahaaga inuu wax ku cuno miiska cuntada si uu uga fogaado wasakhowga cuntada.
- Ilmahaaga ha laga baadho saamaynta waxyeellada lead-ka laba bilood gudahooda kadib baadhitaanka koowaad ama sida uu dhakhtarkaagu ku farayo si uu u eego isbeddel kasta oo ku yimaadda heerka lead-ka ee dhiigga.
- Ha ku kaydin miraha ama casiirka khudradda gasacadaha birta kadib marka gasacadda la furo—isticmaal weel caag ah ama dhalo ah. Ka fagoow isticmaalka koobabka dhaladha ka samaysan ama alaabaha dhoobada la sameeyo ee laga keeno ama kuwa duugga ah.
- Ha u oggolaan ilmahaaga inay ku ciyaaraan ama calashaan waxyaabaha laa daabaco sida wargeysyada ama majaladaha— khada ku jirta waxyaabahaas ayaa laga yaabaa inay leeyihiin macdanta lead-ka.
- Ha u oggolaan ilmahaaga inay ku ciyaaraan carradda, gaar ahaan carrrada dhismooyinka guryaha. Geey ilmahaaga meelo caws leh ama goob ammaan ah.

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan saamaynta waxyeellada lead-ka ayaa la heli karaa iyadoo la wacaayo {«HDPhone»}.

Si daacad ah,

{«HDRepresentativeName»}
{«HDRepresentativeTitle»}
{«HDName»}

Warbixinta Kooban ee Heerka Lead-ka Dhiiga

Waxaa loogu talagalay: {«ChildFirst» «ChildLast»}
Taarikhda Dhalasha: {«ChildDOB»}

Waxaa Diyaariyay:

{«NameofIndividualPreparingReport»}
{«TitleofIndividualPreparingReport»}

Saxeexa: _____

{«HDName»}
{«HDStreetAddress»}
{«City, State Zip»}
{«HDPhone»}

Taarikhda Warbixinta: {«DateofReport»}

I. Soo-gaadhista Saamaynta Lead-ka

Macdanta lead-ka waxay dhaawici kartaa ku dhawaad qayb kasta oo ka tirsan jidhka bini'aadamka waxayna saameyn xun ku leedahay dadka waaweyn iyo carruurtaba. Waxyeellada lead-ka waxay khatar caafimaad u leedahay carruurta da'doodu ka yar tahay lix jsano ir, sababo la xidhiidha korriimadooda degdega ah. Saamaynta ugu weyn oo ay soo-gadhista waxyeellada lead-ka ayaa ah unugyada maskaxda ilmaha ee koraysa. Saamaynta caafimaad ee soo-gaadhista waxyeelladda lead-ka ayaa noqon karta mid waarta ee guud ahaan nolosha ilmaha oo dhan waxayna saamayn kartaa IQ-gooda(garaadkooda), hab-dhaqankooda, iyo awoodooda waxbarasho. In kastoo aan wali la ogaanin heerka macdanta lead-ka ee dhiiga bini'aadamka ku jira oo aan wax khatar caafimaad ah lahayn, heerarka macdanta lead-ka ee ka saraysa ama la mid ah 3.5 micrograms ee deciliter kasta ayaa loo arkaa in ay tahay mid heer sare ah sida ay qeexday Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada ee Maraykanka (CDC) oo waa in tillaabo la qaado si loo dhimo heerka lead-ka ilmaha oo laga dhigo heer ka hooseeya 3.5micrograms ee deciliter kasta.

Inta badan carruurta Ohio ee qaba heerar sare oo macdanta lead-ka waxa ay ka qaadeen siigada guriga taasoi oo ay keentay riinjiga lead-ka ee darbiyadda guriga ee gudaha iyo dibadda dhismayaashii hore oo la dhisay wixii ka horeeyay 1978 ka. Carruurta qaarkood waxaa saamaynta macdanta lead-ka soo-gaadhsiiyo oo keena guriga xubnaha qoyska ee ka shaqeeya shaqooyinka ama hiwaayadaha la xidhiidha macdanta lead-ka Carrada wasakhaysan ayaa sidoo kale ah ilaha keena macdanta lead-ka. Illaha biyaha gaarka loo leeyahay iyo qaar ka mid ah badeecadaha la soo dhoofiyo sida alaabta lagu ciyaaro, waxyaabaha la isku qurxiyo, iyo xawaashka cuntada lagu darro ayaa la ogaaday inay leeyihiin macdanta lead-ka, laakiin inta badan ma'aha sababaha weyn ee keena heerarka sare macdanta lead-ka dhiiga ee carruurta ku nool Ohio.

{**«HDName»**} waxaa la siiyay warbixin ka timid Waaxda Caafimaadka Ohio (ODH) taasi oo hesha dhammaan natiijooyinka baadhitaanka macdanta lead-ka ee dadka deggan Ohio, iyadoon loo eegayn da'dooda ama heerka macdanka lead-ka ee dhiggooda. Barnaamijkani waxa uu caawiyaa xubnaha qoyska, adeeg bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka iyo xubnaha kale ee bulshada si loo yareeyo loogana hortago soo-gaadhista waxyeellada lead-ka. Barnaamijku wuxuu kaloo adeegyo toos ah siiyaa carruurta da'doodu tahay 72 bilood (6 sano).

II. Habka Waraysiga

Marka {**«HDName»**} lagu wargeliyo in qof da'diisu ka yar tahay 72 bilood uu leeyahay heerka macdanta lead-ka kaas oo ka sarreeya ama la mid ah 3.5 micrograms ee deciliter kasta, {**«HDName»**} waxay ayaa isku dayi doonta inay waraysi la yeelato waalidka ama masuulka ilmaha si loo go'aamiyo ilaha suurtogalka ah ee deegaanka ilmaaha kaas oo sababay soo-gaadhista lead-ka .

III. Soo koobida Waraysiga

{**«HDName»**} ayaa heshay warbixin muujinaysa in {**«ChildFirst» «ChildLast»**} uu dhigiisa leeyahay heerka macdanta lead-ka {**«BLLResult»**} **µg/dL** Taarikhda markay ahayd {**«DrawDate»**}. Waraysiga waxaa la sameeya {**«DateofInterview»**} si loo oggaado ilaha suurtogalka ah ee ee sababi kara soo-gaadhista macdanta lead-ka ee ilmahaaga. Warqaysiga waxaa qaaday {**«InterviewerName»**}.

Intii lagu guda jiray waraysiga, qoyskaaga waxaa la waydiiyay su'aalo taxane ah oo ku saabsan deegaanka iyo hab-dhaqanka ilmahaaga waxaana la dhammaystiray xog-waraysi (eeg lifaaqa). Iyadoo{**«HDName»**} laga yaabo inay soo jeediyay hab-dhaqanno gaar ah ama shay laga yaabo inay gacan ka geysteen soo-gaadhista macdanta lead-ka ee ilmaha, suurtogal maaha in la ogaado ilaha dhabta ah ee keenay soo-gaadhista lead-ka ee ilmaha iyada oo aan si buuxda loo samayn qiimaynta khatarta macdanta lead-ka.

Agabyo waxbarasho ayaa la bixiyay si ay kaaga caawiyaan dhimista ilaha keena macdanta lead-ka ee deegaanka ilmahaaga. Fadlan kala xidhiidh {**«HDName»**} lambarka {**«HDPhone»**} haddii aad wax su'aalo ah ka qabto warbixintan ama macluumaadka la bixiyay.

Waxaa dib loo cusboonaysiyaay 06/2024